Alberta

Sii-daynta **wararka**

# Ku-haynta nalalka reer Alberta inay shidnaadaan iyo guryaha oo diirran

Oktoobar 21, 2024 Weydiimaha warbaahinta

## Xeerarka Jiilaalka Alberta ee agabka tamarta ayaa ilaaliya reer Alberta ee nugul iyagoo ka caawinaya in ay nalalkoodu shidnaadaan iyo in guryahooduna diirranaadaan bilaha qaboobaha ee jilaalka.

Marka heerkulku hoos u dhaco, Xeerarka Jiilaalka ee Alberta xagga agabka waxaa loogu talagalay in lagu ilaaliyo korontada iyo kulaylka in loo shido reer Alberta inta lagu jiro bilaha qaboobaha jiilaalka. Xaqiijinta in reer Alberta ay helaan tamar la isku halayn karo oo la awoodi karo waa mudnaanta koowaad ee dawladda Alberta.

Laga bilaabo Oktoobar 15 ilaa Abriil 15, adeegyada korontada iyo gaaska dabiiciga ah ee Alberta si buuxda uma xidhi karaan tafaariiqleyaashu. Tani waxay sidoo kale khuseysaa wakhti kasta inta lagu jiro sannadka marka saadaasha 24-ka saacadood ee soo socota ay muujinayso heerkul ka hooseeya darajada eber.

"Inta lagu jiro jiilaalka adag ee Alberta, qofna waa inaan lagu qasbin inuu kala doorto kuleylinta iyo cunista. Waxaan u ilaalineynaa shidnaanta nalalka kuwa aadka u nugul waxaanan qaadeynaa tallaabo aan ku dhimeyno biilasha korontada dhammaan reer Alberta. Waxaan ku dhiirigelinayaa qof kasta oo ay dhibaato ka haysato biilasha tamarta inay la xiriiraan U-doodaha Macmiilka Ageegyada (Utilities Consumer Advocate) oo ay bartaan doorashooyinka jira."

*Nathan Neudorf, Wasiirka Awoodidda iyo Adeegyada*

Classification: Public

Sida ku cad barnaamijka dib u xidhidda Adeegyada jiilaalka, macaamiisha leh adeegyo go'an ayaa lala xidhiidhaa si ay uga caawiyaan dib u xidhiddooda ka hor inta aanay cimilo qaboobi dhicin. Tan waxaa hogaaminaya U-doodaha Macmiilka Ageegyada (UCA) (Utilities Consumer Advocate (UCA), iyadoo la kaashanaysa Komishanka Ageeyada Alberta (AUC), dukaamada tafaariiqda iyo qaybiyeyaasha iyo wakaaladaha kale ee dawladda. Dadka Alberta ee dhibaato ka haysato bixinta biilasha tamarta, la xidhiidhka kuwa siiya ama samaynta habayn lacag bixineed oo la maarayn karo waa inay la xidhiidhaan UCA.

"Barnaamijka Dib-u-Xiriirinta Adeegyada Jiilaalka waa difaac muhiim u ah macaamiisha la halgamaya biilasha tamarta. Shaqaalaha Dhexdhexaadinta UCA ayaa diyaar u ah inay ka caawiyaan macaamiisha xagga dib ugu xidhidda Adeegyada tamarta oo ay ammaan ku joogaan inta lagu jiro xilliga jiillaalka. Waxaa laga heli karaa 310-4822."

*Chris Hunt, U-doodaha Macmiilka Ageegyada*

Xukuumadda Alberta waxay si aan daal lahayn uga shaqaynaysaa inay hoos u dhigto biilasha tamarta oo ay ilaaliso qiime-bixiyeyaasha, iyada oo hubinaysa in reer Alberta ay ku haystaan in badan oo dollarkooda ay si adag ku kasbadeen akoonadooda bangiga. Iyada oo ay jiraan wax badan oo weli soo socda, dawladda Alberta waxay mar hore qaaday tallaabo iyada oo dejinaysa khidmadaha gelitaanka maxalliga ah iyada oo loo marayo sharci cusub, soo bandhigidda qawaaniinta looga hortagayo kor u kaca qiimaha korantada iyo maalgelinta barnaamijyada lagu caawinayo degmooyinka iyo miyiga Alberta inay maamulaan oo ay hoos u dhigaan kharashkooda tamarta. Intaa waxaa dheer, UCA waxay sii wadaa inay ka caawiso macaamiisha inay si wanaagsan u fahmaan oo ay u maraan suuqa tamarta, iyo u doodiddooda ayaa horseeday in reer Albertan ay badbaadiyaan in ka badan $3.2 bilyan labadii jiil ee la soo dhaafay.

## Fursado koronto oo la awoodi karo ayaa diyaar ah

Alberta waxay leedahay suuq koronto oo tartan gaar ah leh, kaas oo siinaya reer Alberta awood ay ku doortaan bixiyaha tamarta ugu fiican, qorshaha iyo ikhtiyaarka lacag bixinta ku habboon baahidooda. Macaamiishu waxay korantadooda ka iibsan karaan in ka badan 50 tafaariiqle oo tartamaya, iyaddoo ay dooranayaan qandaraasyo qiime go'an ama doorsooma.

Reer Alberta waxa lagu dhiirigelinayaa inay sahamiyaan waxa u furan oo ay helaan heerka tartanka ugu wanaagsan ee ku habboon baahidooda. Sannadkii hore, tobanaan kun oo qoys ayaa ka guuray heshiisyo Heerarka Khiyaarka Dambe oo la karo lana heli karo. Dadka reer

Alberta ee raadinaya caawimaad xagga biilasha adeegga ama la kulmaya khilaaf dhanka adeeg bixiyayaasha waa inay la xidhiidhaan U-doodaha Adeegyada Macmiilka (Utilities Consumer Advocate) 310-4822, habka emailka, ama xagga webseydkooda.

## Macluumaad ku saabsan

- U-doodaha Adeegyada Macmiilka
- Khayraadka Kaalmada Maaliyadda (UCA)
- Komishanka Adeegyada Alberta
- Barnaamijyada shidaalka beeraha iyo adeegga miyiga

## Wara ku saabsan

- Soo bandhigidda Qiimaha Ugu Dambeeyay (Sept. 25, 2024)
- Caawinta bulshooyinka Alberta in hoos loogu dhigo kharashaadka tamarta (Sept. 24, 2024)
- Caawinta reer Calgary inay malaayiin ka badbaadiyaan biilasha korontada (Sept. 19, 2024)
- • Heerarka korantada in hoos loo dhigo kala bar xagga sharciyada suuqa cusub (Sebtembar 5, 2024)
- Korjoogtada korontadu waxay taageertaa dib-u-habaynta suuqa korontada ee Alberta (Aug. 5, 2024)
- Ka hortagga kororka qiimaha korontada (June 26, 2024)
- In biilasha korontada laga dhigo kuwo la awoodi karo (April 22, 2024)
- In korontada laga dhigo mid la awoodi karo (April 18, 2024)

## Su'aalaha warbaahinta

### Ashley M Stevenson

587-357-2141
*Xoghayaha Warfaafinta, Wasaaradda Awoodidda iyo Adeegyada*